**XRW/War-saxaafadeed. 105 /06/2011** **Date: 28.06.2011**

**Khudbadii Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya ka jeediyey Golaha Baarlamaanka**

Mudane Sheikh Sharif Sheikh Ahmed
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya,
Mudane Sharif Hassan Sheikh Aden
Guddoomiyaha Baarlamaanka Soomaaliya
Guddoomiye Ku xigeennada,
Mudanayaasha sharafta leh ee Baarlamaanka,
Ciidamada Amniga, Marti sharafta kale iyo
Bahda Saxaafadda,

Dhammaantiin A Salaamu Caleykum Waraxmatullah Wa barakat,

Sharaf weyn bey ii tahay inaan maanta idinkala soo qeybgalo kulankan muhiimka ah oo aad ku gudaneysaan waajibaadkiina dastuuriga ah ee aad uga doodeysaan ansixinta iyo kalsooni siinta xilka Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya ee uu Madaxweynahu ii soo magacaabay. Baarlamaaku waa hooyada hay'adaha dastuuriga ah, waa goobta matasha shacabka soomaaliyeed, isla markaana laga soo saaro dhammaan shuruucda dalka.

Waxaan hubaa oo aan aaminsanahay inaad wada akhrisateen taariikh nololeedkeyga. Waxaan qabaa inaanan aheyn shaqsi idinku cusub oo waxaan wada joognay 6dii bilood ee ugu danbeysay, sidaas daraadeed, waxaan si wanaagsan ula socdaa marxaladda dalka uu haatan marayo, caqabadihii taagnaa iyo anigoo fikir fiican ka heysta sida looga bixi karo marxaladdahan nagu soo noqnoqday. Waxaan in muddo ah ku howlanaa oo aan shaqooyin muhiim u ah shacabka soomaaliyeed ka hayey dalka gudihiisa. Sidoo kale waxaan si joogta ah ula socday dhammaan marxaladihii dalku soo maray ee dhanka siyaasadda, amniga, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.

Waxaa hubaal ah in mudada noo dhiman nalooga wada baahanyahay inaan si wadajir ah waddanka ugu wada adeegno, isla markaana aan labo jibaarno dadaaladeena ku wajahan sidii aan amniga u soo celin laheyn, isla markaana u dhameystiri laheyn howlaha muhiimka ah ee na wada horyaalla, sida dhameystirka dastuurka qabyada ah iyo ka gudubka xilliga KMG ah.

Xildhibaanada sharafta leh, waxaan si xushmad leh idiin kaga codsanayaa inaad maanta i siisaan kalsoonidiina, si aan u guda-galo una dar-dargeliyo howlaha muhiimka ah ee na wada sugaya. Marka aad i siisaan kalsoonidiina buuxda, waxaan ku dhaqaaqi doonaa la tashiyo aan la sameeyo dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada soomaaliyeed oo ay ugu horreeyaan mudanayaasha baarlamaanka sharafta leh si aan u soo xulo shaqsiyaadka ku habboon inay ka mid noqdaan golaha wasiirada si ay gacan buuxda nooga wada siiyaan u adeegida shacabka soomaaliyeed. Sidoo kale waxaan la tashiyo ka dib idiin soo bandhigi doonaa barnaamijka Xukuumadda iyo xubnaha golaha wasiirada si aad uga doodaan, isla markaana aad uga gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah.

Xildhibaanada sharafta leh,

Walow aan dhowaan idiin soo gudbin doono barnaamijka Xukuumadda oo faahfaahsan, haddana waxaan shaki ku jirin in arrimaha u baahan inaan diirada wada saarno ay ka mid noqon doonaan:

- Soo celinta amniga oo ay ku jrito daboolida baahida ciidanka, soo celinta kala danbeyntii iyo sharaftii dalka;
- La dagaalanka kooxaha argagaxisada ee diidan dowladnimada iyo burcad-badeeda,
- Dhameystirka howlaha muhiimka ah ee uu axdiga FKMG ah na farayo oo ay ka mid yihiin, dhameystirka dastuurka qabyada ah, iyo ka gudubka xilliga KMG ah,
- Dowlad wanaaga, dib-u-heshiisiin qaran oo taam ah, howlgelinta iyo dhismaha hay'adaha dowliga ah,
- Toosinta maamulka dhaqaalaha;
- La dagaalanka musuq-maasuqa;
- Gargaarka bani'aadanimo iyo adeega bulshada;
- Xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha dastuuriga ah,
- Xoojinta xiriirka maamulada dalka ka jira; iyo
- Xoojinta xiriirka bulshada caalamka;

Xildhibaanada sharafta leh,

Waxaa hubaalti ah in xaaladda dalku marayo inay tahay mid khatar ah oo u baahan inaan u wada istaagno. Shacabkii soomaaliyeed waxaa isagu darsoomay, dagaalo joogta ah, abaaro dabo dheeraaday, macluul, argagaxiso, burcad badeed, gaajo iyo iyadoo in badan oo ka mid ah laga hor-istaagay gar-gaarkii ban'aadanimo. Waxaa sidoo kale bur-buray dhammaan hay'adihii adeega ee qaranka isla markaana ummadda wax u qaban lahaa.

Waqtiga aan heysano aad buu u yar-yahay, mashquulka aan ku nahay soo celinta amniga iyo la dagaalanka kooxaha argagaxisada ah waxey keentay in dhammaan Xukuumadihii naga horreeyeyba aysan waqti u helin in ay xoojiyaan xiriirka Dowladda Dhexe iyo maamulada dalka ka jira. Sidaas daraadeed, waxaan ku dadaali doonaa sidii aan xiriirkaas dib-ugu soo nooleyn lahaa oo aan u saari lahaa waxii mugdi iyo kala aragti duwanaan ah ee jira.

Xildhibaanada sharafta leh,

Ugu danbeyntii, waxaan halkan uga mahadcelinayaa Madaxweyne Sheikh Sharif Sheikh Ahmed oo iigu aaminay xilkan Qaran ee culus, anigana waxaan hortiina ka ballanqaadayaa inaan u gudan doono si waafaqsan diinta Islaamka iyo dhammaan shuruucda u degsan dalka, dhowri doonana Axdiga FKMG ah. Waxaan kaloo aan hortiina ku ballanqaadayaa inaan xoojin doono xiriirka wada-shaqeynta dhammaan hay'adaha dastuuriga ah iyo xiriirka beesha caalamka. Sidoo kale idinkana waxaan idinka codsanayaa inaan mudada yar ee aan heysanno aan ka wada shaqeyno sidii aan si wadajir ah isaga wada kaashan laheyn dhan walba, innagoo eegeyna danta guud ee shacabka soomaaliyeed.

Waxaan mar kale ku celinayaa in aan xoojin doono xiriirka Baarlamaanka iyo Xukuumadda. Mahad ballaaran ayaan mar kale idiin soo jeedinayaa.

Mahadsanidiin,

+25261 5479911+252699998854 E-mail: ayarisow@opm.gov.so pm@opm.gov.so Mogadishu, Somalia